# Golaha Wakiillada

## Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka

***Golihii 5$^{aad}$ ee Wakiillada, Kal-fadhigii 3$^{aad}$ fadhigii 2$^{aad}$***

***Wakhtiga uu Furma: -*** 09:47 AM
***Taariikhda: - Axad 09 May 2022***

**Guddoonka: -** Mudane, Cabdirisaaq Khaliid Axmed

**Quraanka: -** Md. Sh. Axmed Dayib

**Ajandaha Fadhiga: -** Doodda Ajandaha Kal-fadhiga 3$^{aad}$

**Guddoomiyaha:** Mudanayaal, maanta waxa inoo furmay fadhigii 2aad ee kal-fadhigan, waxaana aynu shalay qaybinnay ajandihii fadhiga. Maanta fadhigan waxa aynu galaynaa doodda Ajandaha Kal-fadhiga 3aad, waxaana Mudanayaasha u diyaarka ah ka codsanayaa inay doodda isu diiwaangeliyaan. Waxaan doodda ku soo dhawaynayaa Mudane Yaxye Cabdilaahi.

**Md. Yaxye Cabdilaahi:** Bismillaahi. Mudane Guddoomiye, Guddoomiye Ku-xigeennada, Xildhibaanada, Shaqaalaha iyo Bahda Saxaafadda, dhammaantiin salaam calaykum.

Ajandaha maanta aynu ka hadlayno, anigu waxaan ka mid ahaa guddidii Business-ka ee soo diyaarisay, sidaa darteedna waan ku taageersanahay sidii loo soo gudbiyey, loona socodsiin lahaa, lana ansixin lahaa. Wixii la tuhmo inay ka dhiman yihiin waa in lagu daraa, gaar ahaan qodobka toddobaad iyo wixii kale ee soo kordha.

Waxa kale oo aan doonayaa inaan ka hadlo dhowr qodob oo ay xildhibaanadu hore uga hadleen, aniguna aan fikradayda ka dhiibto.

Xagga amni-darrada, amni-darro ayaa ka jirta gobollada iyo caasimadda, taas oo xildhibaanadu si gaar ah cabasho uga muujiyeen. Guud ahaan amniga dalka, waxa masuul ka ah ciidamada kala duwan; ha noqdaan Booliis, Milateri, Sirdoon ama Dambi-baaris. Arrintaas waan ku raacsanahay soo-jeedintii Mudane Xildhibaan Qaasim ee ku saabsan amni-darrada ka jirta magaalada Laascaanood, waxaana leeyahay waa in dawladdu gacan bir ah ku qabataa oo ay si degdeg ah u xakamaysaa.

Bariga iyo Galbeedkaba dhibaatooyin baa ka jira, waana in ciidamada masuuliyaddooda gutaan. Waxa aynu ku naaloon jirnay amni iyo deggenaansho aynu caalamka ku iibin jirnay. Haddii xildhibaan ama muwaadin wax loo geysto, waa in aynu si wadajir ah uga wada jeesannaa. Haddii hay'ad loo malaynayo inay arrinta ku lug leedahay, waa in

hay'addaas la yeedhaa ilaa Wasiirka Arrimaha Gudaha la gaadhsiiyo, lana weydiiyo sababta wax looga qaban waayey.

Waxaan kaloo doonayaa inaan ka hadlo sicir-bararka. Waxa aynu nahay ummad ku tiirsan quutul-daruur dibadda laga keeno. Umad aan isku filnayn oo aan wax-soo-saar lahayn horumar ma gaadho. Halkii aynu guddiyaal kale magacaabi lahayn, waxaan soo jeedinayaa in la magacaabo guddi wax-soo-saar iyo isku-filnaansho, lana la xisaabtamo Wasaaradda Beeraha, lana kordhiyo aqoonta iyo xeeladaha, cilmi-baadhisna la sameeyo, kadibna Golaha loo soo bandhigo.

Xagga waxbarashada, waa in xoogga la saaraa waxbarashada farsamada gacanta iyo xirfadaha, isla markaana si dhab ah loo daba galaa jaamacadaha. Wasaaradda Waxbarashada waa in culays lagu saaraa, maadaama macallimiinta payroll-ka ku jira ay yar yihiin. Wasiirka waa in loo yeedhaa, shaqaalaha waxbarashadana si gaar ah loo daryeelaa.

**Md. Siciid Jaamac Xasan:** Mahadsanid Mudane Guddoomiye. Shir-guddoonka, Mudanayaasha, Saxaafadda iyo Shaqaalaha Golaha, dhammaantiin salaam calaykum waraxmatullaahi wabarakaatuh.

Waxyaabo badan baa xildhibaanadu ka hadleen. Anigu waxaan doonayaa inaan si kooban u dul maro. Waxaan taageersanahay ajandaha, si wanaagsan baa loo soo diyaariyey, waana in sidaas lagu ansixiyaa.

Waxa ina soo maray laba masiibo oo waaweyn: abaarihii iyo dabkii weynaa ee Waheen. Inkasta oo gurmad ballaadhan la galay, haddana dhibaatadii weli way taagan tahay. Inkasta oo roobab da'een, haddana dhulal badan oo abaari ka jirto way jiraan, gaar ahaan gobollada bari sida Sanaag iyo bariga Sool. Arrintaas waa in si gaar ah loo daryeelaa.

Sidoo kale, masiibadii dabka Waheen waxay ahayd masiibo qaran oo hanti badan ku burburtay, waana in laga sii diyaar garoobaa. Arrinta nabadgelyada, gaar ahaan Laascaanood, xaaladdu ma aha mid deggen. Haddii dawladdu keligeed ka adkaan kari weydo, waa in wadajir loo wajahaa, guddi gaar ahna loo saaraa. Waxa kale oo muhiim ah heshiisyada ay dawladdu la gashay hay'adaha caalamiga ah in Golaha la keeno, lana eego, wixii khaldanina la saxo, shir-guddoonkuna si adag u daba galo.

**Md. Axmed Cabdi Ducaale:** Shir-guddoonka, Mudanayaasha, Saxaafadda iyo Shaqaalaha, dhammaantiin waan salaamayaa.

Anigu hadal badan odhan mayo, waan soo koobayaa. Hadalkaygu waa soo-jeedin. Inagu ma nihin fulin, ee waxaan nahay Xildhibaano sharci-dejineed. Mararka qaar waxa muuqata in aynu u jeedsanno arrimaha fulinta. Arrimaha amniga, abaarta iyo wixii la mid ah waxa masuul ka ah dawladdu. Inagu waxa aynu ka doodi karnaa, balse waa in hay'adaha ku shaqada leh loo daayaa fulinta, lagana warsugaa warbixintooda.

Arrinta imaanshaha Madaxweynaha Golaha, Madaxweynaha shir-jaraa'id ma qabto ee waxa uu jeediyaa khudbad sanadeed dastuur ah. Khudbaddaas su'aalo ma laha, maadaama uu ka waramayo wixii dalka u qabsoomay iyo qorshayaasha mustaqbalka. Su'aalaha waxa la weydiiyaa Golaha Fulinta; Wasiirrada iyo masuuliyiinta hawsha gacanta ku haya. Madaxweynaha waa astaanta qaranka, sidaa darteed su'aalo toos ah laguma habboona.

Waxa aan soo jeedinayaa in hadallada la soo koobo, qodobbo nuxur lehna laga soo saaro, shir-guddoonkuna inoo soo koobo wixii shalay iyo maanta laga hadlay.

**Md. Qaasim Aadan Saleebaan:** Xildhibaanada badankoodu waxay ka hadleen ajandaha guud, balse lama siin mudnaanta ku filan xaaladda ugu khatarta badan ee dalka ka jirta, taas oo ah amniga gobollada bari, gaar ahaan magaalada Laascaanood. Waa in ay noqotaa qodobka ugu horreeya ee maskaxda iyo qalbiga xildhibaanadu ku hayaan, maadaama waxa halkaas ka socda ay yihiin dilal iyo dhimasho muwaadiniin ah, gaar ahaan cid kasta oo Somaliland u shaqaysa. Sidaa awgeed, waa muhiim in Goluhu si dhab ah ugu baraarugo, una qaato dareen culus arrintaas.

Haddii ay dhacdo in masuulkeenna ugu sarreeya iyo kan ugu hooseeyaba su'aalo laga weydiiyo arrimaha qaranka, su'aasha ugu mudan waa su'aasha amniga ee Gobolka Sool, sida aan anigu aragti ahaan iyo fikir ahaanba aaminsanahay.

Guddoomiye, Shir-guddoon iyo Mudanayaalba, xaaladda Gobolka Sool waxay ku jirtaa xaalad adag. Xaaladdan waxannu ka digaynay dhawr jeer oo hore. Waxaad la socotaan in dilalku soo noqnoqdeen. Waxaannu hore ugu baaqnay in haddii dilalka ka socda Laascaanood aan la joojin, aanay ku hakan doonin halka ay ka bilaabmeen, balse ay u gudbi doonaan deegaamada kale ee Somaliland. Maanta waa cadahay in tallaabooyinkii aanu ka digaynay ay muuqdaan.

Dilku shalay wuxuu ahaa mid qarsoodi ah; qof la dilay iyo cid dishay toona lama garanayn, waxa keliya ee la ogaan jirayna waa hebel baa mayd ah ama hebel baa xabbad lagu dhuftay. Heerkaa way ka gudubtay xaaladdu. Maanta, dilku wuxuu ka dhacayaa makhaayado lagu fadhiyo, dukaamo, meherado iyo badhtamaha laamiyada ay dadweynuhu marayaan. In makhaayad la yimaaddo, la fadhiisto, xabbad la rido, qofna lagu dilo, kadibna si caadi ah loo dhaqaaqo, halkaas bay maanta maraysaa xaaladdu. Waxa xigi doona, waxaan filayaa, in qof kasta oo inaga mid ahi uu qiyaasi karo.

Sidaa awgeed, waxaan Golaha ku wacyigelinayaa in xaalad degdeg ah ay meesha ka jirto. Waxa loo baahan yahay in guddi la saaro. Haddii loo baahan yahay in masuuliyiin su'aalo laga weydiiyo arrintan, waa in la weydiiyaa. Haddii loo baahan yahay in xal loo raadiyo Laascaanood iyo guud ahaan Gobolka Sool, waa in sidaas la sameeyaa. Arrintani waa tan maanta ugu khatarta badan dalka, waxayna u baahan tahay talo qaran iyo wacyigelin guud. Culaysyada ka jira gobollada kale waanu la qabnaa, waana ka xunnahay, balse mudnaanta maanta waa tan.

Ma doonayo inaan wakhtiga idinku sii dheeraado, laakiin waxaan xoojinayaa oo soo jeedinayaa in xaaladda guud ee dalka lagu hormariyo dhimashada iyo dhiigga muwaadiniinta ee ka socda Gobolka Sool.

**Md. C/kariim Meecaad Isaaq:** Waxaan salaamayaa Mudanayaasha Golaha Wakiillada. Marka hore, waxa muhiim ah inaynu diyaar u noqonno wax-qabad dhab ah. Marka aynu ka hadlayno u codeynta ajandaha, masuuliyiin diyaar u ah inay 18 saacadood shaqeeyaan, wax badan bay qaban karaan.

Marka ugu horreysa, waxaan codsanayaa in Goluhu oggolaado inuu shaqeeyo ilaa 36 saacadood, haddii loo baahdo. Haddii wax la qabanayo, baahiyaha ina horyaalla iyo halka uu dalku maanta marayo waxay u baahan yihiin wakhti badan in la geliyo. Waxa ugu muhiimsan ee aynu ka shaqaynaynaa waa shuruuc; shuruuc la curinayo, la ansixinayo ama wax laga beddelayo, kuwaas oo dhammaantood u baahan wakhti ku filan.

Arrinta labaad, badbaadada nolosha aadanaha waa mudnaanta koowaad ee dunida laga shaqeeyo. Badbaadadaas waxa ka horreeya in la ansixiyo xeerar muhiim ah sida xeerarka caymiska iyo xeerarka badbaadada. Waxaad la socotaan in dabkii suuqa Waheen sababtiisa lagu sheegay cilad ka dhalatay xadhig koronto. Sidoo kale, maalmo dhaweyd roobabkii da'ay waxa aynu aragnay xoolo roobku ku dhegay oo gariiraya.

Dusheenna waxa mara kumannaan xadhig oo koronto ah oo aynaan aqoon u lahayn khatarta ay leeyihiin. Shirkado gaar ah baa dadweynaha laydh gelinaya, lacagna ka qaadaya, balse shuruuc cad oo nidaaminaysa halistaas ma jiraan. Sidaa awgeed, waxa lama huraan ah in la sameeyo shuruuc kala xadaysa xadhkaha korontada iyo khataraha la xidhiidha.

Arrinta saddexaad waa horumarka waddooyinka iyo gaadiidka. Dalka waxa laga hirgeliyey waddooyin waaweyn, gaar ahaan waddada Berbera. Hase yeeshee, shuruucdii iyo nidaamkii badbaadada waddooyinku lama jaanqaadin horumarkaas. Waddada Hargeysa iyo Gabiley oo keliya, lix bilood gudahood, in ka badan 11 qof baa ku dhintay. Taasi waxay muujinaysaa baahida degdegga ah ee loo qabo shuruuc gaadiid iyo badbaado.

Arrinta afraad waa kala xadaynta hay'adaha dawladda. Waxa jira isku-dhac awoodeed iyo is-dul-saar hay'adeed, sida Wasaaradaha iyo hay'adaha tayada, biyaha iyo ganacsiga. Dhammaan arrimahaasi waxay u baahan yihiin shuruuc si cad u kala qeexaysa masuuliyadaha hay'adaha.

Gebogebadii, ajandaha aynu haynaa waxa uu u baahan yahay wakhti iyo dadaal. Waa in aynu soo saarno shuruuc shaqaynaya, isla markaana dib u eegno shuruucdii hore ee aan hirgelin. Macno ma samaynayso in maalin kasta sharci cusub la sameeyo, iyadoo kuwii hore aan la hubin inay shaqaynayaan.

Waxaan ku soo koobayaa in Goluhu noqdo mid diyaar u ah wax-qabad, mudnaantana la siiyo arrimaha bulshada sida caafimaadka, waxbarashada, gaadiidka, laydhka iyo korontada, maadaama ay yihiin baahiyaha ugu daruurisan ee dalka maanta u yaalla. Aad baad u mahadsan tihiin.

**Md. Axmed Yuusuf Nuur (Guruuje):** Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Guddoomiyaha Golaha Wakiillada, Xildhibaanada sharafta leh, Saxaafadda iyo Hawl-wadeennada Golaha, dhammaantiin salaam calaykum.

Waxaan doonayaa inaan ka hadlo laba qodob. Qodobka koowaad waa ajandaha inoo yaalla, kaas oo ay ku jireen warbixinada guddiyada iyo qodobka saddexaad ee ah xaaladda guud ee dalka. Waxyaabo badan oo ay xildhibaanadu tebayaan waxay hoos imanayaan qodobkaa. Waxa keliya ee loo baahan yahay waa in xog-ogaalnimada la xoojiyo, wixii intaa ka dambeeyana waa la soo jeedin karaa oo lagu dari karaa mustaqbalka.

Waxaan soo jeedinayaa in afarta qodob ee ugu horreeya lagu daro qodob shanaad oo odhanaya “iyo wixii kale ee loo baahdo”, si hadalka loo soo ururiyo, loona yareeyo kala firdhinta doodda.

Qodobka labaad ee aan doonayo in ajandaha lagu daro waa miisaaniyadda Supplementary-ga, taas oo shalay iyo maanta laga hadlay. Xildhibaanoow, dhammaanteen waa nala dhaariyey, dhaartaasina waa masuuliyad Ilaahay hortiisa inaga saaran, qof walbana waa laga waydiin doonaa wixii uu ku dhaartay.

Miisaaniyaddu, sida uu dhigayo **Qodobka 55aad, Farqaddiisa 3aad**, doodeeda, ansixinteeda, wax-ka-beddelkeeda iyo diidmadeeduba waa awood gaar u ah Golaha. Golaha marka laga hadlayo oo ka kooban **82 xubnood**, miisaaniyadda ay ansixiyaan waxa ay martaa **saddex saxeex**.

Midka koowaad waa **saxeexa maamul**, kan labaad waa **saxeexa sharci**, kan saddexaadna waa **saxeexa dhaqan-gelinta**. Marka Goluhu ansixiyo miisaaniyadda qaranka, **Shir-guddoonku** ayaa saxeexa; saxeexaasna waxa loo yaqaannaa saxeex maamul, maadaama go’aan aan Shir-guddoonku saxeexin aanu u gudbi karin Xukuumadda. Go’aankaas marka Shir-guddoonku saxeexo oo uu u gudbo Madaxweynaha, isla markaana Madaxweynaha saxeexo, waxa la yidhaahdaa waa **saxeex sharci**. Kadib marka Madaxweynaha saxeexo, miisaaniyaddu waxay u gudubtaa **Wasaaradda Maaliyadda**, halkaas oo **Wasiirka Maaliyaddu** ku saxeexo saxeexa loo yaqaan **saxeexa dhaqan-gelinta miisaaniyadda**. Saddexdaas saxeex ayay miisaaniyaddu ku dhammaataa.

Arrimaha maamul ee Wasiirka Maaliyaddu saxeexi karo ama Shir-guddoonku saxeexi karo waa kuwo kala gaar ah. Anagu, ka Gole ahaan, miisaaniyadda qaranka qayb baynu ku leenahay, qaybtaasna mulkiyaddeeda Shir-guddoonkaa inoo saxeexa. Marka miisaaniyadda la ansixiyo kadib, qolo walba wixii loo qoondeeyey iyadaa saxeexata, nidaamka waarannaduna sidaas ayuu u maraa.

Miisaaniyadda aynu ansixinnay wixii ku soo kordha—ha noqoto khayraad cusub, mashaariic cusub, wax ka soo hadhay tii hore ama kharash hore aan muhiim u ahayn—haddii **kharash cusub la gelinayo** oo **dhaqaale la isticmaalayo**, waa **waajib sharci** in Golaha la hor keeno. Golahani waa inuu eego soo-jeedinta Xukuumadda ee miisaaniyadda, maadaama miisaaniyaddu tahay **qorshayn**; mar shaqaalaha ayaa loo qorsheeyaa, mar caafimaadka, marna nabad-gelyada, gaar ahaan tan Laascaanood.

Maanta, sida aad la socotaan, dunidu waxay maraysaa xaalad adag; waddamo badan ayaa xidhay sahaydii cuntada. Haddii xaaladdu sii adkaato, dhibaato weyn baa iman karta. Waxaynu joognaa **08/05/2022**, roob Somaliland ka da'ay oo doog muuqda keenay ma jiro; geel iyo adhi labaduba waxay ku dhalayaan xaalad baad-la'aan ah, baadna sanadkan ma filayno. Sidaa awgeed, **miisaaniyadda Supplementary-ga** waa in Golahani si gaar ah u eego: ma kayd shidaal baynu samaynaynaa? mise daawo? mise waxyaabo kale oo daruuri ah?

Aniga ahaan, welwel iguma hayso doorasho, balse waxa i haya welwelka xaaladda dunida ka taagan, gaar ahaan shidaalka iyo sahayda inooga iman jirtay oo xidhantay. Sidaa awgeed waa in aynu la soconno caalamka, caqliga, xeerarka iyo **dhaarta la ina dhaariyey**.

Sidaas darteed, waxaan leeyahay **Golaha Wakiilladu** waa inuu miisaaniyadda Supplementary-ga **loo soo gudbiyaa dariiqeedii saxda ahaa**, Guddida Maaliyadduna ha soo eegto, Goluhuna ha is-weydiiyo oo ha ka doodo. Taasi waa **sharci**, waa **xeer**, waana **xaq**. Haddii aynu sidaas yeeli wayno, Ilaahay na ma saamixi doono, taariikhduna na ma illaabi doonto.

**Md. Saleebaan Nuur Warsame:** Waad mahadsan tahay Mudane Guddoomiye. Xildhibaanada dhammaantood waan salaamayaa. Ajandaha sidiisa ayaan u taageersanahay. Inkasta oo qodobka aan ka hadlayaa uu hoos iman karo qodobka *Xaaladda Guud ee Dalka*, haddana waxaan taageersanahay soo-jeedintii lagu darayay **Xeerka Saxaafadda** iyo samaynta **Xeerka Caafimaadka**.

Waxaan sidoo kale ka hadlayaa xaaladaha ugu adag ee dalka ka jira, gaar ahaan **sicir-bararka**. Dadkeennu waa dad dhaqaale yar leh, warshado iyo wax-soo-saarna waynu ku liidannaa. Dagaallada dunida ka socda waxay ina saareen culays dhinaca maciishadda ah, hase yeeshee waxaan qabaa in Xukuumaddu aanay qaadan kaalintii laga rabay.

Inkasta oo aynu leenahay Wasaaradda Beeraha, haddana wax-soo-saar muuqda ma jiro. Sidaa awgeed, waxaan soo jeedinayaa in **Wasiirka Beeraha** la yeedho si wax looga weydiiyo wax-soo-saarka, maadaama wax walba aynu soo dhoofsanno. Sidoo kale, **TV-ga Qaranka** marna laguma arko barnaamijyo wax-soo-saarka dalka ka hadlaya.

Ganacsatadu waxay alaabta u iibinayaan sida ay doonaan, maalin walbana qiime cusub, Xukuumad ka qabanaysana ma muuqato. Wasaaradda Ganacsiguna doorkeedii si buuxda ugama qaadan. Sidaa awgeed, waxaan soo jeedinayaa in loo yeedho **Wasaaradaha Ganacsiga, Warfaafinta iyo Beeraha**.

Intaas waxa aan ku darayaa arrintii la sheegay ee ahayd in Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland uu barri kulan la yeelanayo labada Gole. Waxaan qabaa in Madaxweynaha **su'aalo la weydiin karo**, xaqna aynu u leenahay in aynu weydiino, waana arrin aan si buuxda u taageersanahay.

**Guddoomiye Cabdirisaaq Khaliif:** Waxaan codsanayaa in guud ahaan arrimaha laga hadlo, sida dib-u-eegista xeerarkii hore, dabagalka xeerarka dhaqan-galka ah iyo isla-xisaabtanka. Qodobada guud ha lagu ekaado, si aan dooddu u kala firdhin, maadaama Mudanayaal badani is-qoreen.

---

**Md. Siciid Maxamed Ismaaciil (Siciid-Sokeeye):** Ilaahay ha inooga dhigo fadhi khayr qaba. Qodobka ugu horreeya ee aan hoosta ka xarriiqayaa waa **nabad-gelyada**, maadaama waxba aanay jirayn haddii nabad-gelyo la'aan timaaddo.

Waxaan ku raacsanahay Mudanayaashii iga horreeyey, gaar ahaan arrinta **Laascaanood**, taas oo u baahan in la siiyo mudnaanta ay istaahisho, annagana ka Gole ahaan waa in aynu qaadannaa kaalinteena sharci.

Waxa kale oo si xooggan looga hadlay **caafimaadka**. Anagoo ah Guddida Dabagalka Hantida Qaranka, mar aanu safar ku tagnay tuulada Malawle, waxaan ku aragnay 21 kalkaaliye, dhakhtar iyo laab-farsamo yaqaan oo ku shaqaynayay tabaruc. Iyadoo kumannaan shaqaale ahi ka shaqeeyaan Wasaaradda Caafimaadka, haddana daryeelku wuu liitaa. Sidaa awgeed, waa in aynu wax ka qabannaa si qof walba u helo caafimaad, maadaama isbitaallada gaarka loo leeyahay ay culays ku yihiin dadka danyarta ah.

Waxaan sidoo kale adkaynayaa **kabista miisaaniyadda**, iyo arrinta **maciishadda** oo aad u sii kacaysa, iyada oo aan jirin xeer lagu xakameeyo. Waxaa jira sicir-barar aad u daran oo gacan-ku-rimsi ah. Sidaa awgeed, waxaan codsanayaa in arrinta sicir-bararka si degdeg ah loola hadlo cidda ay khusayso.

Waxaa kale oo aan doonayaa in aan ka hadlo arrin ah in aynu nahay dad leh **shuruuc kala qeexan**, hase yeeshee ay maalin walba dhegahayaga soo gaadhayaan muranno ay dhinacyo kala duwan sheeganayaan in qodobbo gaar ahi iyaga u oggolaanayaan awood ama masuuliyad. Sidaa awgeed, waxaan leeyahay waa in arrimahaas si dhab ah loo dabagalaa, cidda ku shaqada lehna ay baadho xaqiiqada, isla markaana **tallaabo sharci ah laga qaado cidda xadgudbaysa**.

Waxaan sidoo kale hoosta ka xarriiqayaa in **bulsho aan lahayn aqoon ka bilaabanta Alif ilaa Ya** ay ceeb ku tahay dunida ay ku nool tahay. Waxaad la socotaan in inta badan carruurteenna ay u wareegeen **iskuullada gaarka loo leeyahay**, halka kuwii dawliga ahaa ay sii wiiqmayaan, macallimiintiina aanay helin daryeel ku filan. Tusaale ahaan, deegaankii la iga soo doortay oo ay ka shaqeeyaan 100 macallin, 80 ka mid ah ma ku jiraan payroll-ka. Macallin aan mushahar qaadanayn wax-soo-saarkiisu aad buu u yaraanayaa.

Annagoo ka warqabna culayska ku jira nolosha dadka, haddii qiimaha koob shaah ah kordho, iskuullada gaarka loo leeyahayna si toos ah ayay u kordhiyaan kharashka ardayga. Tusaale ahaan, wiil aan dhalay oo aan ka bixin jiray **36 dollar**, maanta waxaan ka bixiyaa **45 dollar**. Waxbarashadu waxay isu beddeshay **ganacsi sicir la kacaya suuqyada**, taas oo culays ku ah qoysaska danyarta ah.

Ugu dambayn, waxaan ku soo gunaanadayaa in aynu **Ilaahay ka baqno**, si wixii aynu go'aaminayno u noqdaan kuwo khayr leh, isla markaana maalinta Qiyaamaha aynu u helno jawaab su'aalaha ah: *xaggee ayaad ka keentay? xaggee ayaad ku bixisay?* Aad iyo aad ayaad u mahadsan tihiin. Haddii aan wax qalad ah ku hadlay, shaydaan ayaan iga keenay; haddii ay wanaag tahayna, Ilaahay ayaa ii waafajiyay.

**Md. Maxamed Jaamac Koodbuur:** Mahadsanid Mudane Guddoomiye. Mudanayaasha, Shir-guddoonka iyo Saxaafaddaba waan salaamayaa. Waxaan u qaatay in dooddeennu maanta ku koobnayd **Ajandaha**, annagoo taageerayna. Hase yeeshee, iyadoo la ixtiraamayo ra'yiga Mudanayaasha, waxa muuqata in aynu galnay qodob ka mid ah Ajandaha oo ah **Xaaladda Guud ee Dalka**.

Ugu horreyn, Ajandahan ina hor yaalla waan taageersanahay. Waxa keliya ee aan ku dari lahaa waa in qodobadiisu yeeshaan **wakhti cayiman (time frame)**; tusaale ahaan, qodobka Xaaladda Guud ee Dalka inta maalmood ayuu qaadanayaa? Taasi waxay fududaynaysaa diyaar-garowga iyo kala hormarinta doodaha.

Waxaan sidoo kale xusayaa xaaladda dalalka aynu jaarka nahay, gaar ahaan **Itoobiya**, oo weli colaado ka jiraan. Waa in aynu Xukuumadda wax ka weydiinnaa waxa ay arrimahaas uga qorshaysan tahay, isla markaana aynu ka faa'iidaysanno **kulanka berri ee Madaxweynaha** uu Baarlamaanka ugu jeedinayo khudbadda sannadlaha ah ee dastuuriga ah.

Waxaan ku taageersanahay in **heshiisyadii Xukuumaddu gashay** la daba-galo, lana waydiiyo wixii ku saabsan. Sidoo kale, sida ay sheegeen xildhibaano kale, waa in la **dabagalaaa xeerarkii Golaha ka baxay**. Haddii aynu xeerar soo saarno oo aan la fulin, waxay noqonayaan dadaal aan miro dhalin, dadweynahana waa ku xaq-daro, maadaama xeerarka loo sameeyo in bulshada loogu adeego. Guddiyada ku shaqada lehna waa in ay Golaha u keenaan warbixinno joogto ah.

Arrin kale oo aan doonayo in aan ka hadlo, sida uu xildhibaan Barkhad u sheegay, waa **cadaadis iyo cabsi gelin lagu hayo xildhibaanada**. Saxaafadda waxaan leeyahay waa in lala xisaabtamaa cidda ku shaqada leh arrimahaas; haddii kale, arrintu waxay noqon doontaa mid faraha ka baxda, maadaama ay caado isu beddeshay.

Waxaan sidoo kale ku taageersanahay soo-jeedinta Guruuje ee ah in **miisaaniyadda kabka ah** Golaha la hor keeno, si loo ansixiyo, una marto dariiqeedii saxda ahaa. Waxa kale oo aan raacinayaa soo-jeedintii Xildhibaan Mukhtaar Maydhane ee ahayd in, inkastoo aynu

ka murugoonay masiibadii **Suuqa Waaheen**, haddana Golaha uu sameeyo **Guddi Xaqiiqo-Raadin** ah oo warbixin naga siisa halka ay hawshu marayso.

**Md. Mubaarik Muuse Ismaaciil:** Marka hore waan salaamayaa Golaha, Shaqaalaha iyo Saxaafaddaba. Waxaan soo jeedinayaa dhowr qodob oo ku saabsan Ajandaha. Ugu horreyn, waxaan taageerayaa Mudane Cabdirashiid ee ka hadlay **Xeerka Dakhliga Shidaalka**, kaas oo annagoo guddi ah aan hore u haynay. Waxaan soo jeedinayaa in xeerkaas Ajandaha lagu daro, maadaama uu yahay xeer muhiim ah, isla markaana uu ku daba socdo xeerkii shidaalka ee hore loo ansixiyay.

Ajandahan ina hor yaalla iyo xeerarka ku qoran, waxaa iiga muhiimsan in aynu **Gole ahaan ka hadalno doorashooyinka inagu soo fooda leh**. Maalin walba xisbiyo cusub ayaa furmaya, iyadoo aan jirin xeer nidaamiya ururradaas. Annagoo ah Gole sharci-dejineed, waa in aynu arrintaas ka hormarinnaa, si aanay hawlo innaga hor iman annagoo aan diyaar ahayn.

Waxaan soo jeedinayaa in **qodob gaar ah** laga dhigo arrimaha doorashooyinka, lagana saaro Xaaladda Guud ee Dalka, si si cad oo toos ah looga doodo. Waxaad la socotaan waraaqdii Madaxweynaha ee ku saabsan **waafajinta saddexda doorasho**, taas oo aan weli la dhammeystirin, isla markaana horseeday khilaafkii xeerka 14. Arrintaas waa in si degdeg ah loo soo qaadaa.

Maadaama guddiyadeennu ku shaqeeyaan hawlo daba-gal ah, waa in Gole ahaan la taageero, loona garab istaago, si ay shaqadooda u gutaan. Tusaale ahaan, **Hay'adda Tamarta** oo aan haysan sharci ay ku shaqayso, arrinteedii waa laga hadlay, Guddida Dhaqaaluhuna waxay soo jeediyeen muddo lix bilood ah. Sidaa awgeed, waa in la ixtiraamaa soo-jeedinta guddiyada; haddii kale wada-shaqayntu way burburaysaa.

Sida uu xildhibaan Meecaad sheegay, waxa jira hay'ado lagu dhawaaqay iyada oo aan sharci loo samayn. Hay'ad kasta oo aan sharci ku shaqayn, waa in Goluhu u qoro waraaq ay shaqada ku joojinayso ilaa sharci loo sameeyo.

Sidoo kale, hay'ado waaweyn oo ka shaqeeya horumarinta mashaariicda, sida **SDF**, waa in Golaha korjoogteeyo, lana waydiiyo wixii u qabsoomay iyo wixii aan u qabsoomin.

Ugu dambayn, arrinta **sicir-bararka** ee dalka ka jirta waa in aynu ka hadalno annagoo aan ku koobnaan hadal, balse go'aanno cad ka soo saarno. Shirkadaha shidaalka iyo laydhku waxay kordhiyaan qiimaha sida ay doonaan, iyaga oo aan raacin xeer. Sidaa awgeed, waa in Gole ahaan arrimahaas si dhab ah loogu hawlgalaa.

Waxaan sidoo kale ku taageersanahay soo-jeedintii Xildhibaan Maydhane. Aad iyo aad ayaad u mahadsan tihiin.

**Md. Xuseen Aadan Cabdi:** Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Mudane Guddoomiye, aad iyo aad baad u mahadsan tihiin. Anigu waxaan waafaqsanahay in Ajandaha sidaas lagu

ansixiyo. Waxaase muuqata in Mudanayaal badani ay si ballaadhan uga hadleen qodobo hoos imanaya **Xaaladda Guud ee Dalka**.

Waxaan soo jeedinayaa in arrimaha loo kala hormariyo **sida baahidu u kala culus tahay**. Sida aad ka wada dharagsan tihiin, gobollada bari waxa ka dhacay xaalado adag oo abaareed iyo biyo-la'aanba leh. Ka hor masiibadii Suuqa Waaheen, gurmad ballaadhan baa loo fidin jiray, balse wixii ka dambeeyey waxaad mooddaa in Xukuumaddu ku mashquushay Suuqa Waaheen oo keliya. Inkasta oo roobab kooban da'een oo meelaha qaarkood biyo galeen—sida Gobolka Togdheer—haddana dad badan weli waxay ku jiraan biyo-dhaan; shalay oo u dambaysayna aniguba waan ka qayb qaatay biyo-dhaankaas. Sidaa awgeed, waxaan soo jeedinayaa in arrintaas mudnaanta la siiyo.

Waxaan sidoo kale ku darayaa, sida Mudanayaashii iga horreeyey sheegeen, in arrinta **Laascaanood** oo dilal qorshaysan ka socda ay u baahan tahay feejignaan joogto ah. Sidoo kale, kabkii miisaaniyadda ee hadhsanaa in meel mugdi ah ka baxay waa arrin khalad ah; Golahanna waxaa ku jira fayo-qab guddiyadeed, sidaas darteed waa in **runta la isku sheegaa**. Maaddaama maanta la gudbiyey kabkii, halka markii hore waxyaabo kale la gudbiyey, isla markaana mustaqbalka waxyaabo kale la gudbin doono, Goluhu wuu joogaa—runta ha loo sheego.

Qodob kale, arrinta amni-darrada ee la sheegay: wixii jiraa ha inoo yimaaddaan oo ha inoo caddaadaan; yaan la buunbuunin. Waxaan u arkaa in buunbuunintu tahay khalad aan waxba ka jirin, Mudanayaashuna waa inay iska celiyaan. Sidoo kale, Guddiyada Doorashooyinka hawshoodu si wanaagsan bay u socotay intaanay gelin faragelinaha hadda jira; iyaga oo xaq u leh inay is-doortaan. Waxaan leeyahay **Xukuumaddu ha joojiso faragelinta**, annagana ka Gole ahaan aynu si dhow ula soconno wixii khaldan.

**Md. Xasan Saleebaan Dhuxul (Laab-saalax):** Asalaamu Calaykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuhu. Ilaahay baa kaligiis mahad leh. Soomaalidu waxay ku maah-maahdaa: *"Baadi nin aad doon-doonin ma soo helin."* Ajandahan ina hor yaalla—iyadoo xeerar badan ay ka soo noqdeen labadii Ajande ee ka horreeyey—waxaan ka tebaya **yeedhidda masuuliyiinta Qaranka**. Golahani waa Gole shaqadiisu tahay **la-xisaabtan**, waajibaadkiisuna waa mid dastuur ah; hase yeeshee yedhiddaas gebi ahaanba way ka maqan tahay.

Waxaan soo jeedinayaa in Ajandaha lagu daro **Xeerka Anshaxa Golaha**, sidoo kale in lagu daro **Qorshaha Horumarinta Shan-Sano (Five-Year Plan)** oo muddo laga soo shaqaynayey, kana maqan Ajandaha.

Mudane Guddoomiye, waxaa jira xeerar aan u baahnayn in dib loo curiyo balse u baahan **wax-ka-beddel iyo kaabis**; kuwaasna waxaa ka mid ah: **Xeerka Shaqaalaha Rayidka**, **Xeerka Jinsiyadda**, **Xeerka Dhulka**, **Xeerka Ururrada Aan Dawliga ahayn**, **Xeerka Maalgashiga**, **Xeerka Socdaalka**, iyo **Xeerka Ciidanka Booliska**. Xeerarkaas dhammaantood waa in Goluhu ka doodo, wax-ka-beddel iyo kaabisna ku sameeyo.

Sida aynu wada ognahay, doorashooyin baa dalka ku soo fool leh. **Golaha Guurtidu** waa Gole muhiim ah oo door muuqda ka qaatay dhismaha dalka; hase yeeshee muddo rubuc-qarni ku dhow ayuu fadhiyaa isaga oo aan lahayn xeer nidaamiya. Waxaan soo jeedinayaa in xeerkaas la sameeyo **ka hor** inta aan la gaadhin doorashadooda.

Waxaan sidoo kale ka hadlayaa masiibadii **Suuqa Waaheen**; anigoo xildhibaan ah, waxaan u mahadnaqayaa dhammaan dadkii ka hawl galay, gaar ahaan **Ciidamada Dab-damiska**. Hase yeeshee, in sababihii masiibadaas si cad loo garan waayo waxay ka dhalatay maqnaanshaha **Xeerka Dab-damiska**. Waa waajib in Golahani dedejiyo xeerarka noocaas ah si caqabadaha ummadda horyaalla loo xalliyo.

Mudane Guddoomiye, waxaa kale oo laga hadlay **heshiisyada ay Xukuumaddu gashay**—kuwa shirkadaha caalamiga ah iyo isgaadhsiintaba. Shir-guddoonka waxa ka saaran waajib ah inuu qoraal u qoro Xukuumadda, uguna yeedho in heshiisyadaas la horkeeno Golaha.

Mudanayaal, sida dadkeennu ugu baahan yihiin caafimaad iyo biyo, ayay ugu baahan yihiin **xeerar shaqaynaya**. Xeerarka aynu samaynaynaa waa in ay noqdaan kuwo si dhab ah loo daba-galo. Maxkamadaha dalka waxa ay ku shaqeeyaan **Xeerka Ciqaabta Guud**; miisaaniyaddii aynu ansixinnayna waxa ku jiray **Komishanka Dib-u-habaynta Shuruucda**, sidoo kale **Garyaqaanka Guud** waxa uu ka shaqeeyaa wixii Xukuumaddu keento. Haddaba, haddii Komishanku hal sharci inaga caawin kari waayo, maxaa ummadda lacag looga qaadaa? Waxaan soo jeedinayaa in Goluhu **la-xisaabtamo Komishankaas**. Sidoo kale, **Wasaaradda Xidhiidhka Golayaasha iyo Dastuurka** oo shaqo weyn qaranka u haysa—Golahani waa inuu la yeeshaa xidhiidh dhow.

Ugu dambayn, waxaan rajaynayaa in kal-fadhigan uu ka midho-dhalo labadii ka horreeyey, annaguna aynu noqono masuuliyiin shaqadooda si qiimo leh u guta, anagoo ku hadlaya **xaqiiqo** oo aan ka fogaanayna **buunbuunin**. ASC.

**Md. Barkhad Jaamac Batuun:** Dood iyo niqaash badan ayay Xildhibaanadu geli doonaan. Waxaan ku darayaa laba qodob. Bilihii u dambeeyey, bahda saxaafaddu waxay tebiyey **af-duubyo iyo cabsi-gelin** lagu sameeyo dhalinyaro hal-abuur leh, suugaan-yahanno, suxufiyiin iyo dad aragtiyadooda ku cabbira baraha bulshada—kuwaas oo **Caasimadda** ka dhacaya, mudo la haysto kadibna la sii daayo. Gobolka kale lagama soo sheegin.

Hay'adaha amnigu **warbixin cad kama soo saarin**; lama xaqiijin cidda falalkaas ka dambaysa—ma ciidan dhar-cad ah baa, ma Boolis baa, yaa abaabula, yayse ka tirsan yihiin? Goluhu su'aalahaas si rasmi ah ugama weydiinin, waana arrin **muhiim ah**. Nimcada Somaliland haysataa waa **amniga**; sidaa darteed, waa dhaqan aan la mahadin karin in ficillo noocaas ahi ku soo noqnoqdaan Caasimadda.

Arrintu intaas kuma eka; waxay gaadhay **Xildhibaano ka tirsan Golaha**, kuwaas oo Dastuurku u dammaanad qaaday **xasaanad**. Sidaa awgeed, waa in Goluhu si cad oo degdeg ah arrintan u galaa, loona helo xaqiiqadeeda, laguna qaadaa tallaabo sharci ah cid kasta oo ku lug leh.

Shalayto, Xildhibaano qaar ayaa inala wadaagay in **argagax-gelin baahsan** lagu hayo; gawaadhidoodana la hor-istaago. Waxay sheegeen in marka ay arrintaas u dacwoodaan hay'adaha amniga aan waxba laga qaban. Sidoo kale, qaar ayaa sheegay inay awoodi waayeen inay **reerahooda la soo ciidaan ama u safraan gobollada dalka**, sababo la xidhiidha amniga (*for security purposes*).

Su'aasha is-weydiinta leh waxay tahay: **Xildhibaan xasaanad leh** haddii uu ku jiro cabsi iyo baqo-gelin, awood noocee ah ayuu maskax ahaan u yeelan karaa **curinta xeer**, **imaanshaha Golaha**, ama **fulinta waajibaadkiisa**?

Xildhibaano qaar waxay sheegeen inay **Xeer-ilaalinta** u gudbiyeen dacwado, lagana qaaday lambaradii lagu hanjabay, magacyadii iyo sawirradiiba; hase yeeshee **cid tallaabo qaadday ama wax ka qabatay ma jirto**. Haddii arrintan si qoto dheer loo eego, waxay inagu celinaysaa waxyaabo aynu **30 sano ka soo gudubnay**.

Waxaan soo jeedinayaa in **tallaabo cad laga qaado**; cidda ficilladaas samaynaysana **ma aha cadaw shacab**, balse waa **cadaw Somaliland iyo jiritaanka qaranimadeenna**. Sidaa awgeed, waa in **masuuliyiinta amniga Golaha loo yeedhaa**, lagana waydiiyo halka ay ku aroorayaan, cidda ay ka tirsan yihiin, iyo sababta loo qaban waayey dadkaas **gawaadhida wata ee dadka qafaalanaya, baskooladaha ku cabsi-gelinaya**. Ka hor inta aynaan hawlo kale gelin, waa in aynu **mudnaan siinnaa amniga guud ee dalka**, gaar ahaan **ilaalinta xasaanaddeenna iyo amnigeenna**. Niman bacaysan oo la baqo-gelinayo sida ay bulshada ugu adeegayaan anigu ma garanayo.

Mushkiladaha dalka ka jira—kuwa ay **suxufiyiintu** ka cabanayaan, **xadhigyada**, **ciqaabaha**, **eedaymaha Booliska**, **Maxkamadaha** iyo **Xukuumadda**—iyadoo intaba midna aanu si buuxda u qaadan mas'uuliyadda, maanta waxa inaga la doonayaa **gargaar qaran**. Guusha ugu weyn ee taariikhda Somaliland maanta laga gaadhi karo waa **wax-ka-beddelka iyo kaabista Xeerka Ciqaabta Guud** ee Maxkamadaha yaalla.

Xeerka Ciqaabta Guud waa **mushkiladda ugu weyn** ee la dagaallamaysa Dastuurkeenna iyo **xuquuqaha aasaasiga ah**, kana hor imanaysa dimuqraadiyaddeenna. Waa xeer ay ku eedaysan yihiin **garsoorka**, **Booliska**, iyo guud ahaan **maamulka dalka**. Xeerkaasi **ma kala saaro** shirkadaha waaweyn, masuuliyadaha, mana aha **marjac casri ah** oo la jaanqaadi kara nolosha 2022. Qodobo ka hadlaya **xisbiyada** iyo **hanaanka dimuqraadiga ah** marka dambiyo ka dhex dhacaan **kuma jiraan**. Xeerka laftiisa **kuma qorna qaranimadeenna Somaliland**; waxa ku qoran in cidii kala-gooska Jamhuuriyadda Soomaaliyeed ay dambiilayaal yihiin—annaguna **qaran madax-bannaan** baynu nahay. Sidaa darteed, xeer qaranimadeenna ka hor-imanaya oo Maxkamadaha yaal **ma la fal-geli karo** dhaqaalaheenna, tiknoolajiyaddeenna, siyaasaddeenna iyo dhaqankeennaba. Wax kasta oo **Dastuurka ka hor-imanaya**—sida uu dhigayo **Qodobka 5aad**—waa **waxba kama jiraan**, marka aragti sharci lagu eego.

Sidaa darteed, **curinta** marka laga hadlayo, waxaan soo jeedinayaa in **Xeerka Ciqaabta Guud** laga dhigo **xeerka ugu horreeya** ee Goluhu wax-ka-beddel iyo kaabis ku sameeyo. Waa **ceeb qaran** in Xeer jaldigiisa ku qoran *Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya* uu Maxkamadeenna dhex yaallo, laguna xukumo dadkeenna. Waxaan ku baaqayaa in **82-deena Mudane** aynu isku duubanno oo aynu xeerkaas **ka qabanno dalka, dadka iyo Diinteennaba**. Aad baad u mahadsan tihiin. **WSC.**

Masiibadii ka dhacday **Suuqa Waaheen** runtii waxay ahayd masiibo weyn oo qaranka guud ahaan ku cusbeyd; saamaynteeduna waxay taabatay qoysas iyo ganacsato badan—kuwa hoose, dhexe iyo sareba. Sidaa awgeed, anigoo ka Gole ahaan, waxaan qabaa in **Qodobka 3aad (Xaaladda Guud ee Dalka)** uusan ku filnayn in halkaas lagu koobo. Waxaan jeclaan lahaa in **Suuqa Waaheen** laga dhigo **Ajande gaar ah**, si loo eego wixii Golaha waajib ka saaran ee arrintaas.

Qodob kale: tiirarka uu dalku ku dhisan yahay waxaa ka mid ah **Saxaafadda Qaranka**. Waxaa jira dhibaato xooggan oo ka jirta **xidhiidhka saxaafadda iyo xukuumadda**; Ramadaantii dhaweydna **in ka badan 14 saxafi** ayaa la xidhay. Xadhigu laftiisu dhib ma aha; balse waxa loo baahan yahay in **Xeerka Saxaafadda**—kaas oo ilaalinaya xuquuqdooda iyo isku-miisaamaya xuquuqda hay'adaha—**Ajandaha lagu daro**, lagana doodo, si uu xeer u noqdo.

Marka laga yimaaddo qaab-dhismeedka Ajandaha, **Qodobka 53aad ee Dastuurka Somaliland** waxa uu tilmaamayaa waajibaadka Golaha Wakiillada; marka laga yimaaddo curinta xeerarka, waxa inaga saaran **la-xisaabtan** iyo **u-yeedhid masuuliyiinta Qaranka**. Sidaa awgeed, waxaan jeclaan lahaa in **kal-fadhi kasta** si cad loogu tilmaamo **cidda la yeedhayo** (amniga, caafimaadka iwm), si ay Ajandaha ugu soo baxdo, masuuliyiintuna u sii ogaadaan inay **xisaabtan u diyaargaroobaan**, marka laga reebo xaaladaha degdegga ah (*emergency*).

Qodobka iigu dambeeya: Goleheenna waa **Gole cusub**. Shaqadii ugu horreysay waxay ahayd **Xeer-hoosaadka Golaha** ee nidaaminaya wada-shaqaynta 82 Xildhibaan. Dastuurku waxa uu inoo oggol yahay in aynu **la kaashanno Golaha Guurtida** oo aynu samayno **Xeer-hoosaad wadajir** (joint sittings) oo qeexaya sida fadhiyada wada-jirka ah iyo wada-shaqaynta labada Gole u dhici doonto. Sidaa darteed, waxaan soo jeedinayaa in **arrintan Ajandaha lagu daro**, haddii gudi loo saarayo ama qaab kale loo marayo.

**Wabillaahi Towfiiq. WSC.**

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha W. Shuruucda & H/qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada** |
| ------------------------------------------------ | -------------------------------------- |